


Somali | Soomaali



BIG HOUSING BUILD

Waqooyiga Melbourne

Wixii ku soo kordhay Bulshada



Xarunta lagu qaabilo dadka la rarayo ayaa u furan dadka deggan 159 Melrose St.

Dadka la rarayo waxay iman karaan oo ay la hadli karaan howlwadeenka u qaabilsan arrimaha raritaanka ee ku sugan maktabadda ku taal 159 Melrose Street, maalmaha Arbacada ah inta u dhaxaysa saacadaha 10:00-ka subaxnimo ilaa 12:00-ka duhurnimo.

Dadka deegaanka ee guuraya waxay sidoo kale kula xiriiro karaan howlwadeenka u qaabilsan arrimaha guuritaanka iimayl ama telefoon.

Howl wadeenkaaga u qaabilsan raritaanka ayaa kula shaqeyn doona si uu u fahmo baahiyahaaga. Waxay kugu xiri doonaan adeegyada taageerada kugu haboon.

Markaad diyaar noqoto, waxay kaa caawin doonaan inaad u guurto guri kugu haboon.

Jadwalka loo dejiyay dadka la rarayo ee deggan Melrose Street



Febraayo 2026

Waxaan dhageysanay fikradaha ay qabaan in ka badan 300 oo qof oo guryaha deggan kuwaas oo nala wadaagay macluumaad naga caawinaya inaan bilowno howlaha qorsheynta.



Maajo 2026

- Guddiyada Xiriirinta Bulshada ayaa kulmay si ay su'aalo u weydiiyaan xogtana isula wadaagaan
- Kulamada macluumaadka ee loogu talagalay dadka guryaha deggan iyo qoyska iyo saaxiibadood ayaa sii soconaya.
- Better Health Network ayaa diyaar u ah inay caawiso dadka deegaanka ee u baahan taageero dheeraad ah.



Luulyo 2026

- Howlwadeenka u heelan arrimaha raritaanka ayaa la xiriiro dadka deegaanka si ay u qorsheeyaan wadhadalka ugu horreeya.
- Xarunta lagu qaabilo dadka la rarayo ayaa la furayaa si ay u bixiso taageero goobta ka ag dhow.
- Dadka guryaha deggan ayaa loo soo bandhigi doonaa inay soo arki karaan guryaha agtooda ku yaal.



Dabayaaqadii 2026

Guryaha cusub ee goobta ka ag dhow ayaa la dhameystiri doona waxayna diyaar u noqon doonaan in loo soo guuro.



Febraayo 2028


Dhamaan dadkii guryaha deganaa waa la raray.

Nagu xirnoow

- Kulamada la isku xog wareysanayo**
- Ra'yigii nalagula wadaagay kulamadii wadatashiga**
- Isdiiwaangeli si aad ula socoto wixii soo kordha**

Si aad wax kasta ula socoto booqo:

homes.vic.gov.au/north-melbourne-precinct



nagala soco baraha bulshada raadi
Homes Victoria



Xarunta arrimaha raritaanka ee ku taal Melrose Street ayaa furan.

Dadka deegaanka ayaa booqan kara si ay ula hadlaan howlwadeenka u qaabilsan arrimaha raritaanka.

Meelaha dhirta lagu beeray ee Buncle Street ayaa hadda furan.

Goobaha dhirta lagu beeray ee laga soo raray 33 Alfred St ayaa helay hoygooda cusub ee ku yaal Beerta Bulshada ee Buncle Street (Buncle Street Community Garden).

Shaqadii ka socotay 76 Canning St ayaa hada lasoo gebagebayn rabaa.

Shaqooyin dayactir ah ayaa ka socda jaranjarooyinka dhismaha oo dhan.

Wixii la socda North Melbourne

Bilaha Luulyo/Ogosto 2026

159 Melrose Street

Dadka ayaa waqti xaadirkan guuraya

Xarun lagu maareeyo raritaanka ayaa hadda u furan dadka deggan 159 Melrose Street.

Kaalay oo kula hadal howlwadeenka u qaabilsan howlaha raritaanka maktabada dhexdeeda xilli kasta oo maalmaha Arbacada ah.

33 Alfred Street

Dadka ayaa waqti xaadirkan guuraya

Howlaha shaqo

Laga bilaabo 20-ka bisha Luulyo waxaa dabaqyada la faaruqiya iyo meelaha jaranjarooyinka ka socon doono shaqo wax lagu baarayo.

Inta lagu jiro wakhtigaas waxaa laga yaabaa inaad maqasho xoogaa shanqadh ah.

Waxaan cabbiri doonnaa shanqarta meesha ka socota inta lagu guda jiro shaqooyinkan kuwaas oo la qaban doono 9-ka subaxnimo ka dib.

Waxaa sii socda:

- Sugidda iyo samaynta guryo bannaan oo ammaan ah
- Waxyaabo qayb ka ah guryaha laga guuray ayaa laga saarayaa

Shaqooyinka shubka

- Waxaan hagaajinaynaa sagxadaha shubka ah ee meelaha ay dadku ku socdaan ah iyo jaranjarooyinka dibadda ku yaal si loo xaqiijiyo badbaadada dadka guryaha degan.
- Waxaa laga yaabaa inaad aragto shaqaale ku sugan gudaha iyo hareeraha dhismaha.
- Waxaa laga yaabaa in la sameeyo isbeddello ku-meel-gaar ah oo lagu sameeynayo meelaha ay dadka ku lugeeyaan iyo in wadooyinka qaar la xiro inta lagu jiro xilligaas.
- Dadka meesha degan marwalba waa ay geli karaan guryahooda.

12 Sutton Street

Dib u dhiska mustaqbalka

- Shaqooyin dayactir oo muhiim ah ayaa socon doona laga bilaabo bisha Abriil 2026 ilaa bisha Diseembar 2026.
- Shaqaaluhu waxay isticmaalayaan jaranjaro si ay u gaaraan meelaha kore ee darbiyada banaanka
- Shaqaalaha shaqada ka hayay qolalka hortooda, jaranjarooyinka, meelaha dharka lagu dhaqo laguna qalajisto

Howlaha shaqo

- Xoogaa yar oo shaqo ah oo lagu hubinayo ciidda iyo adeegyada dhulka ayaa socon doono bilaha Luulyo iyo Agoosto.

76 Canning Street

Dib u dhiska mustaqbalka

- Laga bilaabo bartamaha bisha Luulyo waxaa la samayn doonaa dayactir lagu sameynayo jaranjarooyinka dhismaha oo dhan.
- Fadlan raac tilmaamaha lagu dhajiyay wiishashka iyo albaabbada laga galo jaranjarooyinka si aad u tagto meesha aad u socoto.

Beerta Bulshada ee Buncle Street

Meelihii la dayactiray ee dhirta lagu beeray ayaa hadda furan.

Waxa ka socda 33 Alfred Street

Lama samaynayo dumin inta ay dadku wali degan yihiin dhismeyaalkan.

1. Barashada wax badan iyo ka dhigida wax kasta ammaan

- Sugidda guryaha bannaan
- Kormeerista goobta iyo dhismayaasha si qalabka loogu maareeyo si amaan ah
- Joogtaynta dayactirka joogtada ah

2. Diyaargarowga

- Diyaarinayo goobta iyo calaamadaha wax haga/tilmaamaya si loo sugo ammaanka goobta
- Hubinta isku xirka adeegga
- Dadka lugeynaya, baabuurta iyo baarkinada baabuurta oo amaan howlahooda ammaan laga dhigayo
- Howlo shaqo ayaa waxay ka socdaan gudaha dhismayaalka si amaana looga dhigo

3. Duminta

- In la dhameystiro biraha laisku rakibayo
- Waxa gudaha ku dhisan in lasoo saaro
- Dhismaha marka si taxadar leh oo tartiib-tartiib ah loo burburinayo
- Si joogto ah in bulshada loola socodsiiyo wixii soo cusboonaada



Shaqadayada waxaa haga saacadaha shaqada ee golaha deegaankaaga:

Isniin ilaa Jimce	Sabti
inta u dhaxaysa 7am iyo 7pm	inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo iyo 3-da galabnimo

Dadka goobta degan ee u baahan macluumaad dheeraad ah hala xidhiidhaan xafiiska guryaynta ee deegaankooda:

1300 360 462 northmelbourne.housing@dffh.vic.gov.au



Mararka qaarkood ogolaanshaha (permit) ay bixiyaan golaha deegaanka ayaa loo baahan yahay si looga shaqeeyo wax ka baxsan saacadahan laakiin dadka goobta degan waan la socod siin doonaa haddii ay tani dhacdo.



Dhammaan howlaha shaqooyinka waxaa lagu fulin doona heerarka ugu sarreeya ee badbaadada iyo shuruudaha sharciga.



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luqadaada booqo: homes.vic.gov.au/information-in-your-language



Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

enquiries@homes.vic.gov.au